

Ka Hortagga Faafidda HIV – Hooyada-ilaa-Cunugga

In hooyada ay cunugga u gudbiso HIV waa waddada ugu badan ay caruurta ku qaadaan HIV. Waxaa dhici karto in dhallaanka qaadeen HIV:



- Marka hooyada ahayd xaamilo
- Marka cunugga ka soo baxaayay siilka
- Marka uu cabbo caanaha naaska hooyada qabta HIV

Waxaa jira dawooyin oo dhallaanka ka badbaadiya cudurka HIV. Marka hooyooyinka qaba HIV helaan daawo la dirirta firuska HIV marka hooyada xaamilo tahay, waqtiyada foosha, iyo waqtiyada dhalmaada iyo caruurtana ku dhashaan qaliinka loo yaqaan *Cesarean* (Jeexa-C), halista cudurka HIV waxay hoos u dhacdaa in ka yar **2%**. Marka hooyada qabto HIV, dhallaanka waxaa kaloo la siiyaa dawoyinka HIV (dawooyinka ka hortagga firuska HIV) ilaa marka uu dhasho.



Waxaa kaloo jira daweyn kale oo waxtar u leh dumarka aan la soconin in ay qabaan HIV ilaa ay ka galaan

foosha. Haddii ay helaan dawooyinka HIV waqtiyada foosha iyo dhalmaada, halista in cunugooda qaado cudurka HIV waxaa hoos loo dhigi karaa in ka yar **10%**. Hooyada qabta HIV ee aan qaadanin dawooyinka HIV (dawooyinka ka hortagga firuska HIV) waqtiyada uurka, foosha,

ama dhallmada, waxay firuska u gudbin kartaa cunugga ilaa **25%**.

In cunugga ku dhasho qaliin ama uu ka soo baxo siilka waa shay loo baahan yahay in aad kala hadashid bixiyahaada xanaanada caafimaadka marka aad xaamilo tahay. Waxay ku xernaan doontaa caafimaadkaada, xaaladda daweynta HIV, iyo sida fooshaada u socoto waqtiga aad dhaleysid.

Baaritaanka HIV ee la siiyo Dumarka Uurka leh



CDC waxay ku tallisaa in dhamaan dumarka laga baaro HIV – laakin dhamaan bixiyeyaasha

xanaanada caafimaadka ma bixiyaan baaritaanka HIV ee toos ahaan loo siiyo dumarka uurka leh. Haddii aad xaamilo tahay una maleysid in aad qabtid HIV ama cudur laga qaado galmada (STD), waxaa aad muhiim u ah in aad codsatid baaritaanka HIV.



Baaritaanka HIV ee lagu Sameeyo Dhallaanka

Unugyada la dagaalama bakteriyaha iyo firuska waa maadooyin uu jirka sameeyo si uu ula diriro cudurada. Baaritaanka shaybaarka sheega haddii qofka uu qabo cudurka HIV, wuxuu caadi ahaan

raadiyaa unugyada ka hortagga HIV. Dhamaan caruurta ay dhallaan hooyooyinka qaaday HIV waxaa laga helaa *unugyada* ka hortagga HIV. Unugyadaan ka hortagga firuska waxaa sameeyay siistemka difaaca hooyada, waxay galaan dhiigga dhallaanka ka hor inta uusan dhallanin. Unugyadaan waxay ku jiri karaan ilaa 18 bilood. Unugyadaan waxay muujiyaan in hooyada qaaday HIV, laakin taa macnaheeda ma aha in dhallaanka uu qaaday cudurka. Tan macnaheeda waxay tahay in baaritaanka unugyada ee caadi ahaan lagu baaro cudurka HIV in aysan ahayn kuwo waxtar u leh dhallaanka ama ilmaha yaryar.

Bixiyeyaasha xanaanada caafimaadka waxay adeegsadaan baaritaanka HIV kuwasoo dhab ahaan ogaan kara qiyaas aad u yar oo ah firuska ku jira dhiigga



caruurta da'doodu ka yar tahay 6 bilood. (Xasuuso, inta badan baaritaanada HIV waxay raadiyaan unugyada ka hortagga firuska, ma aha firuska naftiisa.) Marka la adeegsado baaritaano khaas ah, taqatiirta waxay aqoonsan karaan ku dhawaad 90% dhallaanka qaaday cudurka HIV ilaa da'doodu ka gaarto 2 bilood, iyo 95% ilaa ay gaaraan 3 bilood. Dhamaan dhallaanka hooyada qabta HIV waa in laga baaro HIV dhowr jeer sannadka ugu horeeyo kaddib marka uu cunugga dhasho.

Haddii aad qaaday HIV aadna tahay xaamilo, waxaa muhiim ah in aad bixiyahaada xanaanada caafimaadka kala hadashid qorshaha laguugu daweeyo adiga iyo dhallaankaada kaddib marka aad dhashid.



Hubso in aad jawaab u heshid su'aalaha aad ka qabtid HIV/AIDS. Waaxdaada xanaanada caafimaadka dadweynaha iyo bixiyahaada

xanaanada caafimaadka ayaa ku siin kara kaalmo.

Text adapted from materials on the AIDS.gov website.
Handout by Healthy Roads Media (www.healthyroadsmedia.org),
Funding from Division of Specialized Information Services of the
National Library of Medicine. It can be freely distributed under the
Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License
(<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us>)